

Hagaha guryeynta qaxootiga jooga Scotland



Ikhtiyaarada guryeynta: ka guuritaanka Glasgow

Waraaqda 2 – Desember 2010

Somali

Marka aad hesho go'aan togan oo la xidhihda dacwadaada magangelyo, waliba waxaad helaysaa isla xuquuqda ay u haystaan adeegyada guryeynta muwaadiniinta UK, oo ay ku jirto xornimada aad ku doorato meesha aad ku noolaan doonto.

Hasa ahaate, haddii aad doonayso inaad u guurto England ama Wales, midaasi waxaa laga yaaba inay xooga dhibaato tahay marka fadlan eeg qeybta ku saabsan ka guuritaanka Scotland ee waraaqdaan, iyo/ama ka raadso talo bixin Kooxda Guryaha.

Waxa laga yaabaa in aad waliba go'aansato in aad ka guurto Glasgow. Haddii ay sidaa tahay, xashidani waxay sharxaysaa sidaa u heli karto guryeyn iyo waxa dhici doona marka kaalmadaada magangelyo ee aad ka helaysay Xaffiska Hoygu (horay loo yiqiin NASS) joogsato. Waa in aad hubisaa in aad hesho talo wanaagsan intaanad go'aan ku gaadhin in aad Glasgow ka tegtid. Waxaad kala xidhiidhi kartaa kooxdayada guryeynta qaxootiga **0800 085 6087**.

Waxaan haystaa fasax aan ku sii joogo – Maxaa xiga?

Mar haddii Hay'adda Xuduudda UK ay fasax aad ku sii joogto UK, ma sii ahaanaysid magangelyo doon. Tani waxay ka dhigan tahay in aanay Hay'adda ku sii wadi doonin in ay ku siiso kaalmo maaliyadeed ama mid hoy.

Waxaan haystaa fasax aan ku sii joogo waxaan doonayaa in u guuro meel kale oo Scotland ah. Maxaan sameeyaa?

Haddii aad mar hore ka habaysatay gurigaaga meesha aad noonayso, waxa kaliya ee samaynaysaa waa adigoo ogeysiin siiya bixiyaha gurigaaga aad hadda ku jirto oo aad dabadeedna u guurto gurigaaga cusub. Adigaa masuul ka ahaan doona habaynta gaadiidkaaga iyo rarista alaabtaada.

Haddii aanad hore u habaysan gurigaaga, markaa waxa laga yaabaa in aad u baahato in aad qorato dalab guri laawe. Sidaad arrintan u samaynaysaa waxa ay ku xidhan tahay meesha aad hadda ku nooshahay:

- Haddii aad ku nooshahay guri u Golaha Degaanka Glasgow bixiyey, markaa waa in aad Golaha u sheegtaa in aad doonayso in aad baxdo. Goluhu wuxuu ku siin doonaa ogaysiis aad kaga baxdo guriga ay ku siiyeen Xafiiska Hoygu (hore u ahaa NASS).Ogeysiintan ayaad isku geyn kartaa hoy laawe ahaan meesha aad doonayso in aad ku noolaato.
- Haddii aad ku jirto guri ay bixiyeen Angel ama YMCA, markii ogeysiin ayaa lagu siin doonaa. .Ogeysiintan ayaad isku geyn kartaa hoy laawe ahaan meesha aad doonayso in aad ku noolaato..

Sideen u samaysanayaa dalab hoy laawe?

Degaano badan ayaa leh koox hoy laawayaal ah oo habeeya dhamaan dalabyada hoy laawayaasha, ama xafiisyada guryeynta degaanka ay laga yaabaa in u ogolaado. Waad heli kartaa meesha aad u qoran lahayd dalabkaaga hoy laawe waxaanad wic kartaa Golaha meesha aad doonayso in aad ku noolaato

Ka raadi macluumaad xidhiidhka golaha degaanka websiteka Scotland Directgov:

http://www.direct.gov.uk/en/DI1/Directorries/DevolvedAdministrations/DG_4003604

Waxaad waliba ka helaysaa faafaahin xidhiidhk gole walba Buugga Talada Adeegyada ee Scotland.

Adaa ka masuul noqonaya habeynta gaadiidkaaga iyo qaadista alaabtaada.

Maxaa dhacaya marka aan sameeyo dalab guri laawe?

Waayo doorasho lku saabsan ka bixista guriga ma lihid, waxaad u qoran kartaa dalab hoy laawe Golaha meesha aad doonayso in aad ku noolaato. Waa shaqadooda in ay hoy ku siiyaan ilaa inta ay ka go'aan gaadhayaa dalabkaaga..

Si go'aan looga gaadh dalabkaaga, goluhu waa in u tixgeliyaa laba arrimood. Waa in u

- Xaqiiji inaad guri la'aan tahay, ama aad guri la'aan noqon doonto, ilaa iyo labada bilood ee soo socota;
- Laga go'aan gaadho mudnaanta la siinayo dalabkaaga, waayo waxa jira dad badan oo guryeyn raadinaya. Wuxuu tixgelinayaa, tusaale ahaan, caafimaadkaaga iyo caafimaadka xubin kasta oo qoyska ka mid ah oo kula joogta, iyo in aad caruur haysato, xaaladaada magangelyo doon hore ahaan, iyo
- In aad hubiso in aanay qalad aad samaysay ahayn in aad hoy laawe noqoto. Sababtoo ah maad haysan doorasho ku saabsan ka tegista hoygaaga hadda, aad ayey ugu dhowdahay in Goluhu tixgeliyo in aanad ogaan guri laawe u noqon..

Sideen u ogaanayaa waxa Goluhu go'aansaday?

Waxaad heli doontaa warqad kuu sheegaysa waxa u Goluhu go'aansaday 28 maalmood gudahood ee dalabkaaga. Haddii aad aaminsan tahay in u go'aanku qalad yahay, xaq baad u leedahay in aad weydiiiso Golaha si u dib u eego. Waa in aad isla markaaba talo raadsataa inta aanad tan samayn: kala xidhiidh kooxdayada guryeynta qaxootiga **0800 085 6087**.

Kawnsilku waxa uu go'aansaday inaan guri la'aan ahay. Maxaa dhici doona hada?

Kawnsilku waxay ku raadin doonaan guri joogto ah. Kawnsil walba waxaa laga yaaba inuu leeyahay sharci u gooni ah oo wey ku kala duwan yihiin inta mar ee ay ku siin karaan guri joogto ah. Mar kasta oo guri lagu siinayaa waa inay ahaataa mid qoraal ah. Qasab ma aha inaad qaadatao guri lagu siiyo haddii aad u malaynayso inuusan soo buuxinayn baahidaada ama aanu maquul ahayn. Hasa ahaate, ka hor inta aadan diidin guriga, waa inaad talo bixin ka raadsataa kooxdeena guryaha qaxootiga oo lambarkoodu yahay **0800 085 6087**.

In aad sugto ma aha inta u Goluhu kuu fidinayo guri. Waa in aad aliba:

- Bilowodaa in aad ka dalbato guryeyn ururada guryeynta;
- Tixgeli ama ka fakir kirayn gaar ahaaneed.

Ka raadi macluumaad dheeraad ah websiteka Shelter Scotland:

http://scotland.shelter.org.uk/getadvice/advice_topics/finding_a_place_to_live/asylum_seekers_and_refugees/asylum_seekers_with_leave_to_remain/former_asylum_seekers_and_homelessness#3

Ma doonayo in aan dalab hoy laawe samaysto. Waamaxy doorashhoyinka guryeyn ee Scotland?

Waxa jira dhowr siyaabood oo kalae duwan oo lagaga helayo hoy cusub Scotland:

- Waxaad ka kireysan kartaa gole degaan ama urur guryeyn
- Waxaad ka kireysan kartaa dhul qabeen gaar ah ama hay'ad guryo kireysa
- Haddii aad wax ka baranayso koolaj ama jaamacad, waxa laga yaabaa in aad awoodo in aad ka kireysato iyaga
- Waxaad iibsan kartaa guri

Sidee baan uga kireysan karaa Gole Degaan?

Golayaasha Scotland badankoodu waxay hayaa guryeyn kiro. Haddii aad ka weyn tahay 16 oo aad fasax haysato aad ku sii joogto, waxaad dalban kartaa guryeyn degaan.

Si aad u dalbato guryeyn degaan, waxaad u baahan tahay in aad buuxiso foom dalab, oo aad ka heli karto waaxda guryeynta ee degaanka. Waxaad u qori kartaa, wici kartaa ama aad weydiisan kartaa qof ahaan xafiiska Deganka. Waxa la socda foomka, xaashiyo u ku siin doono Goluhu oo sharxaysa:

- Sida loo buuxiyo foomka
- Waraagaha aad u baahan tahay si sugnaanta isir loo garto;
- Maxaa lagu sameynayaa markaad buuxiso;
- Sidee buu u go'aansanayaa goluhu cidda guri ugu hor helaya.

Goluhu wuxuu u dhow yahay in haysto liisto sugayaal ah; waxay qiimayn doontaa intee baad u baahan tahay guri iyadoo la raacayo shuruuc jirta – siyaasadeeda qaybinta. Tusaale ahaan, waxay siin doonta mudnaan dadka hoy laawayaasha ah.

Sidee baan uga kireysan karaa urur guryeyn?

Waxaad awood u yeelan i doontaa sidaa u heli lahayd foom dalab urur guryeyn oo kasta oo gaadho, oo macluumaad la socdo ku saabsan sidaad u dalban lahayd iyo sida u ururku u qaybiyo guryihiisa. Ururada badankoodu waxay leeyihiin liistooyin dheer, sidaas awgeed kan oo kaliya haku eekaysiin kala doorashadaada. Ka raadi dheeraad ku saabsan helista meel aad ku noolaato websiteka Shelter Scotland:

http://scotland.shelter.org.uk/getadvice/advice_topics/finding_a_place_to_live/housing_associations

Sidee baan uga ijaaran/kiraysan karaa dhul qabeen gaar ah?

Waxa jira dhowr siyaabood oo aad ku heli karto hanti gaar ahaaneed oo kiro ah. Waax kari kartaa in:

- Weydiiso qoyskaaga, saaxiibadaa ama dadka aad wada shaqeysaan in ay ogyihiin meelo jiro
- Ka hubi xayeyiinada daaqada dukaamada, kuwa meelaha lagu soo dhejiyo subarmaarkityada, meelaha bulshadu isugu timaado ee ay ku kulanto ama koolajyada iyo jaamacadaha. Waxa samayn kartaa qudhaado ogeysiis aad ku sheegayso in aad guri raadinayso.
- Ka hubi xayeyisiyada waraaqaha degaanka iyo joornaalada.
- Ka eeg onlineka: waxa jira websiteyo farabadab oo taxa hantiyo kira ah
- Gaadh hay'adaha kireynta – xaafisyo ayey ku leeyihiin meelaha laga dukamaysto badankooda.

Waxyaabo badan ayey tahay in la tixgeliyo marka aad si gaar ah u kireysanaysid. Eeg Xaashiyaha 6ee taxanahan, 'Ka kireysashada dhul qabeen gaar ah', kaasoo laga helo websiteka Golaha Qaxootiga Scottishka. Waa in aad ka raadisaa talo dheeraad ah kooxdayada guryeynta qaxootiga **0800 085 6087**. ka raadi dheeraad ku saabsan kireysasha meel lagu noolaado websiteka Shelter Scotland.:

http://scotland.shelter.org.uk/getadvice/advice_topics/finding_a_place_to_live/renting_privately/finding_private_rented_accommodation

Haddii aan ahay ardayna?

Marka ay jaamacadi ama koolaj kuu fidiyo meel, waa in ay waliba kuu soo dirtaa macluumaad ku saabsan hoy. Haddii aanad waxba helin, wac waaxda koolajka ama jaamacadda ee hoygaall the college's or university's accommodation department. ka raadi dheeraad ku saabsan kireysasha meel lagu noolaado websiteka Shelter Scotland.

http://scotland.shelter.org.uk/getadvice/advice_topics/finding_a_place_to_live/student_accommodation

Arday ahaan, waxaan ka dalban kartaa koonsilka ama ururada guryaha, ama waxad raadsan kartaa meelo gaar loo leeyahay.

Weydii Xafiiskaaga Guryeynta Ardayga si aad uga hesho liisto dhul qabeena ah oo ka kireeya ardayda, haddii aad arday tahay.

Sideen ku iibsan karayaa guri?

Markii aad iibsanayso guri, waxaa muhiim ah inaad marka hore raadsato la talinta xaga lacagta oo uu bixiyo la taliye dhaqaale oo madax banaan si aad u habsato inaad awoodo bixinta lacagta gurigaas, iyo sidoo kale ku habsato inaad awoodi doonto milkiilanimada gurigaas mustaqbalka.

Hab sharci ayaa ilaalinaya kaaga iyo danaha iibiyahaba marka aad iibsato guri. Hubi in aad haysato talo wanaagsan, oo la door bidayo mid qareen. Halka waxa ah waxyaaba ugu weyn ee aad u baahnaan doonto in aad samayso:

- Hubi in aad karayso in aad guri iibsato – iyo waliba qiimaha iibka; waxa jiri doona qiimayaal kale, sida feeda eegidda ee sharciga ah.
- Waa in aad haysaa sharci yaqaan oo ka shaqeeya bhabka sharciga ah
- Raadi hantida aad doonayso

Waxa jira hab dhigan oo u yaala iibsasho guri, oo qaadan karta wakhti dheer, noqon kartana qaali sidaad u hesho meel haboon, sidaas` darto hubi in aad in aad talo wanaagsan haysatid

Ka raadi dheeraad ku saabsan guri iibsasho websiteka Shelter Scotland:

http://scotland.shelter.org.uk/getadvice/advice_topics/finding_a_place_to_live/buying_a_home

Waxaan haystaa fasax aan ku sii joogo oo waxaan doonayaa in aan u guuro England ama Wales. Maxaan sameeyaa?

Haddii aanad mar hore habayn hoygaaga, si taxadir leh uga fakir aad sida sameynayso oo talo raadso. Waxa laga yaabaa in ay kugu adkaato in aad ku joogto hoy laawe ahaan meelahan, waayo England iyo Wales sharciga guryeyntoodu wuu ka duwan yahay ka Scotland. Dawladaha hoose ee meelahan waxa laga yaabaa in ay kugu celiyaan Scotland haddii tusi weydo xidhiidh degaameed.

Waa maxay xidhiidh degaameed'?

Adigoo ka cararaya dhibaato hoy ama mid kale mooyaane, waxaad u baahan in aad cadeyso in aad ka haysato xidhiidh degaameed meesha` aad doonayso in aad u gurto – tani waxay noqon kartaa:

- Xidhiidh qoys—hase ahaatee aan ahayn qaraabo
- Baahiyo caafimaad –haddii aanad ka helayn daaweynta aad u baahan tahay meesha aad hadda ku nooshahay
- Shaqo – kan waa in u ahaada shaqo la soo xaqiijiyey.

Ku sheegi kari maysid waxbarasho ama meel tababar xidhiidh degaameed. Masuul ayaad ka ahaan doontaa habaynta gaadiidkaaga iyo qaadidda alaabtaada.

Haddii aad mar hore ka habaysay gurigaaga meesha aad doonayso, waxa kaliy oo aad siin kartaa bixiyaha gurigaaga hadda ogeysiin waxaanad u guuri kartaa gurigaaga cusub. Adaana ka masuul ah habaynta gaadiidkaaga iyo qaadashda alaabtaada.

Halkee baan dheeraad ka heli karaa?

Xashiyahani waxay bixinayaa talo guud. Waa in aad si taxadir aad ah leh u fakirtaa inta aanad ka tegin Glagow. Haddii aad jeceshahay in aad falanqayso doorashooyinkaaga, waa in aad la xidhiidhaa **0800 085 6087**